

*Isbeddel Dhaqmeed habeen qurq  
iskuma wada beddelo. Dugsiyada  
Dadweynaha Miniyaabolis ayaa ku  
jirta hanaankii ay ku samayn  
lahaa dhaqaaq sida aan u  
caawinayno, una hormarinayno  
waxbarashada ardayga fasalkasta.  
Degmada ayaa dhaqan galisay  
qaabdhismeed Baridda iyo  
Barashada (IFL) ama Mac-  
hadka waxbarashada (the  
Institute for Learning) kaasoo naga  
caawinaya jibaynta waxa aan  
barno, sidaan u barno, tan ugu  
muhimsannab, sida ardaydu u  
bartaan, iyo waxa aan samaynayno  
markaysan fahmin. Waxaa jira  
sagaal mabaadii' ee barasho,  
kummasoo fure u ah ardaydaadu  
inay bartaan. Waxaan rumaysan  
nahay inay ardaydu caqli badnaan  
karaan hadii la siiyo casharro  
khibrad, waqti,shaqo macne  
samaynaysa iyo dadaal. Waxaan  
ka shaqaynaynaa sidii aan u  
abuuro labayn bay'ad dugsiga sida  
caadiga ku adag barashada, taasoo  
korisa ka fakaridda barashada iyo  
barashada fekerka..*

Haddii aan nahay waalid, waa muhiim inaan ogaataan sida mabaadii'idani ugu caawinayso inuu guulaysto. Afarta Mabda' ee waxbarashada ee shaqaaluhu eegayaan inay u adeegsadaan waxbarashada sannadkan ayaa isugu jira:

#### ■ **RAJO IYO WAX LA FILAYO OO CAD (CLEAR EXPECTATIONS)**

Haddaynu ardayda oo idil ka rajeyno inay ku aflaxaan heer aad u sarreeya, marka waxaan u baahan nahay inaansi cad u qeexno waxaan ka doonayno inay ardaydu bartaan. Waalid ahaanna waa inaad ogtihiin waxa la doonayo in ardaydiinu bartaan iyo sida dhibcaha lagu bixinayo. Cunugaagu wuxuu kaloo fahmi doonaa tallaabooyinka laga doonayo inay qaadaan si ay u hantaan shaqadaasi.

**Su'aalaha aad ka fekerayso:** *Ma garanaysaa waxa laga filayo cunugaaga cutub kasta? IImahaagu ma garanayaan sida ay u hagaajin karaan shaqadooda? IImahaagu ma garnayaan waxay ay baranayaan iyo sababta?*

#### ■ **TACLIIN AD-ADAG (ACADEMIC RIGOR)**

Fekerka, xallinta mashaakilaadka iyo aqoonta ayaa si wadajir ah isugu xiran. Manhajka ayaa loo habeeyey bu' nuxuraysan. Ardayda ayaa barata xirfadaha fekerka marka la baro sida su'aalaha la isu weydiyo, loo xalliyo mashaakilka, wax loo saadaaliyo, fekerkooda raaciyaan sababo la aqbali karo, isla markaasna bilaabaan sharraxaad si ay u tijaabiyaan fahamkooda nuxurka. Cashar kasta ardayda waxaa la weydiyaay inay fekeraan isla markaasna sababeeyaan.

**Su'aalaha aad ka fekerayso:** *Ardaydaadu ma inay tarjuntaan waxay akhriyeen isla markaasna sharraxaan fekerkoodaa?*

#### ■ **WADA HADAL LA XISAABTAN LEH (ACCOUNTABLE TALK)**

Kuwa kale ood kala hadasho fikradaha iyo shaqada ayaa muhiim u ah barashada. Wada hadalka faslalka horumariya barashada waa inuu ahaadaa mid lagula xisaabtami karo waxbarashada bulshada, si loo saxo aqoonta iyo fakarka ad-adag. Ardayda ayaa adeegsada markhaati ay ku ayidayaan fakarkooda. Fasalka dhexdiisa wada hadalka ugu sarreeya ayaa dhexmara ardayda dhexdeeda –macallinka se ma aha. Ardayda ayaa ka qayb qaata wadahadalka xisaabtanka leh, iyagoo adeegsanaya dodo waxbarasheed, koox idil iyo koox yar, faca iyo shirarka ardayda iyo macallinka.

**Su'aalaha aad ka fekerayso:** *Cunugaagu ma ku weydiya su'aalo, si uu wax uga barto? Ardaygaaga ma la weydiyey inay sharraxaan fikirkooda, ku kabana fikirkooda ayidaad, isla markaasna ku dhisaan fasalka fikrado ama shaqadoodaba?*

#### ■ **BULSHAYNTA GARASHADA (SOCIALIZING INTELLIGENCE)**

Waxaan aaminsan nahay in arday kasta xaq u leeyahay inuu ogaado waxa la weydiyey inay sameeyaan iyo sababta, waxayna xaq u leeyihiin waajibna ah inay su'aalaan haddii aysan wax fahmin. Waxaan kale oo rumaysan nahay in ardaydu ay samayn karaan shaqada lagu weydiyey dugsiga dhexdiisa, hadii la baray xeeladaha iyo waxyaabaha ay adeegsanayaan. .

**Su'aalaha aad ka fekerayso:** *carruurtaadu ma qaadanayaan mass'uuliyadda shaqadooda? Ardaydaadu ma awoodaan inay sharraxaan waxay ay baranayaan, iyad waxyaabaha ay adeegsanayaan si ay u bartaan? Miyey horumarinayaan siyaabo ay ku hoggaamiyaan fikirkooda?*

Hoggaamiyeyaasheenna iyo macallimiinteenna ayey ka go'an tahay qabashada shaqada, iyo aaminsanaanta in ardayda oo idil ay baran karaan, taasina waa inay ka dhex muuqataa dugsiyadeenna. Haddii aad u baahan tahay macaluumaad dheeraad ah ee la xiriira Mac-hadka Waxka Barashada (IFL), waxaad ka la xiriiri kartaa Dr. Beth Russell Lam. 668-0218 ama e-mail-keeda ah :  
Beth.Russell@mpls.k12.mn.us